51. Dhab ahaan baan u halaagnay kuwa idin la mid ah, ee wax waantoobi ma jiraa.

وَلَقَدْ أَهْلَكْنَآ أَشْيَاعَكُمْ فَهَلْ
مِن مُّدَّكِرٍ ٥١

52. Wax kastoo dadku falo wuxuu ku suganyahay Kutubta.

وَكُلُّ شَىْءٍ فَعَلُوهُ فِى ٱلزُّبُرِ ٥٢

53. Wax kastoo yar ama waynna waa qoranyahay.

وَكُلُّ صَغِيرٍ وَكَبِيرٍ مُّسْتَطَرٌ ٥٣

54. Kuwa dhawrsadana waxay gali Jannooyin iyo wabiyaal.

إِنَّ ٱلْمُتَّقِينَ فِى جَنَّٰتٍ وَنَهَرٍ ٥٤

55. Meel la fadhiisto oo xaq ah oo Eebaha awoodda leh agtiisa ah (yaa u sugnaatay).

فِى مَقْعَدِ صِدْقٍ عِندَ مَلِيكٍ مُّقْتَدِرٍۭ ٥٥

Gaaladii reer Makaad iyo xaq diidayaashuba kama wanaagsana Gaaladii hore ee la halaagay, Ruux iyaga ka mid ah oo xumaan la'aan Eebe u ballanqaadayna ma jiro, xoog ku faanna qiimo ma leh, immisaa jabtay cid is bidaysay tiro iyo tayaba, xusuuso Maalintii Badar ee Muslimiinta iyo Gaaladu kulmeen iyo Maalmihii ka dambeeyayba, waxayna ku tusin xaqnimada quraanka iyo siduu Eebe ballankiisii u oofiyay, waxaase Gaalo jab Adduun u sii dheer caddibaadda Qiyaame iyo Naarta Saqara.
Eebeheenna wax walbaba qadarbuu ku ahaysiiyay, wax ku culusna ma jiro, wax walbana Kitaab-buu ku yaallaa, kuwa dhawrsadana wuxuu ku abaalmarin Janno iyo sharaf, iyo meel la fadhiisto meeja u fiican.
Waxaa laga wariyay Cabdullaahi binu Cumar in Rasuulkii Eebe yidhi (naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee)(Ummad la arko waxay leedahay Majuusi, Majuusiga Ummaddaydu waa kuwa dhihi Qadar ma jiro, Hadday bukoodaan ha booqannina, hadday dhintaanna ha u tagina). waxaa wariyay Imaam Axmad Binu xambal.
Hadalkii Nabiga ee saxiixa ahaana waa: (Eebe kaalmayso hana cajisin, haddii wax kugu dhaco dheh waa qadar Eebe wuxuu doonayna wuu falay, Hadhihin haddaan falilahaa sidaas waxay noqonlahayd sidaas, qoomammo waxay furtaa fal shaydaan). Al-Qamar (43-55).

## Suurat Ar-Raxmaan

## سُورَةُ الرَّحْمَٰن

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista:

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. (Eebaha) Raxmaan ah.

ٱلرَّحْمَٰنُ ١

2. Wuxuu baray (Nabiga iyo dadka kalaba) Quraanka.

عَلَّمَ ٱلْقُرْءَانَ ٢

3. Dadkana wuu abuuray.

خَلَقَ ٱلْإِنسَٰنَ ٣

4. Wuxuuna baray dadka (Hadalka).

عَلَّمَهُ ٱلْبَيَانَ ٤

5. Qorraxda iyo dayaxuna waxay ku socdaan xisaab.

ٱلشَّمْسُ وَٱلْقَمَرُ بِحُسْبَانٍ ﴿٥﴾

6. Xiddigga iyo Geedkuba way Sujuudaan (Eebe Dartiis).

وَٱلنَّجْمُ وَٱلشَّجَرُ يَسْجُدَانِ ﴿٦﴾

7. Samadana Eebaa koryeelay, Garsoorna wuu dajiyay.

وَٱلسَّمَآءَ رَفَعَهَا وَوَضَعَ ٱلْمِيزَانَ ﴿٧﴾

8. Si aydaan uga gudbin Caddaaladda.

أَلَّا تَطْغَوْا۟ فِى ٱلْمِيزَانِ ﴿٨﴾

9. Miisaanka ku hagaajiya Caddaalad, hana nusqaamininna.

وَأَقِيمُوا۟ ٱلْوَزْنَ بِٱلْقِسْطِ
وَلَا تُخْسِرُوا۟ ٱلْمِيزَانَ ﴿٩﴾

10. Dhulkana Eebe wuxuu u dajiyay khalqiga.

وَٱلْأَرْضَ وَضَعَهَا لِلْأَنَامِ ﴿١٠﴾

11. Dhexdiisa waxaa ah Faakihad (khudaar) iyo Timir Fiido leh.

فِيهَا فَٰكِهَةٌ وَٱلنَّخْلُ ذَاتُ ٱلْأَكْمَامِ ﴿١١﴾

12. Xubuubna (midho) ball leh iyo udgoona wuu abuuray.

وَٱلْحَبُّ ذُو ٱلْعَصْفِ وَٱلرَّيْحَانُ ﴿١٢﴾

13. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan (Insi iyo Jinniyow).

فَبِأَىِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿١٣﴾

14. Dadka Eebaa ka abuuray dhoobo Jilay oo kale ah.

خَلَقَ ٱلْإِنسَٰنَ مِن صَلْصَٰلٍ كَٱلْفَخَّارِ ﴿١٤﴾

15. Jaankana wuxuu ka abuuray ololka Naarta.

وَخَلَقَ ٱلْجَآنَّ مِن مَّارِجٍ مِّن نَّارٍ ﴿١٥﴾

16. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَىِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿١٦﴾

Eebe wuxuu ku billaabay Magaciisa Raxmaan ah, iyo Nicmooyin badan oos ugu nicmeeyay khalqigiisa, sida Quraanka uu baray Addoomadiisa, Abuuridda, hadalka, Qorraxda, Dayaxa, Xiddigaha, Geedaha, Cirka, Dhulka iyo Caddaaladda uu soodajiyay, Saas daraadeed yuu ku soo celceliyay Suuraddan u digidda beeninta Nicmooyinkiisa.
Jaabir waxaa laga wariyay Eebe ha ka raalli noqdee inuu yidhi: Waxaa u Soo baxay Rasuulkii Eebe Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee Asaxaabtiisii, wuxuuna ku akhriyay Suuratu-Rraxmaan billawgeeda ilaa dhammaadkeeda, markaasay aamuseen wuxuuna yidhi: (Waxaan ku akhriyay Suuraddan Jinniga Habeenkii Jinniga, iyagaana idinka fiicnaa Raddinta (Jawaab), markastoon imaaddo hadalka Eebe Sarreeye: (Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan) waxay dhahaan: Mid Nicmadaada ka mid ahna Eebahannow beeninmayno Adaana mahad iska leh). waxaa wariyay Tirmidi. Ar-Raxmaan (1-16).

---

17. Ilaaheen waa Eebaha Labada Qorrax ka soo bax iyo Labada Qorrax u dhac.

رَبُّ ٱلْمَشْرِقَيْنِ وَرَبُّ ٱلْمَغْرِبَيْنِ ﴿١٧﴾

18. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ١٨

19. Eebe waan kan Labada Badood dariseeyey iyagoo kulmi.

مَرَجَ ٱلْبَحْرَيْنِ يَلْتَقِيَانِ ١٩

20. Dhexdoodana yeelay soohdin (kala reebta) iskumana xadgudbaan.

بَيْنَهُمَا بَرْزَخٌ لَّا يَبْغِيَانِ ٢٠

21. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٢١

22. Waxaa lagala baxaa Baddaas Lu‘Lu‘ iyo Murjaan (Jawhar).

يَخْرُجُ مِنْهُمَا ٱللُّؤْلُؤُ وَٱلْمَرْجَانُ ٢٢

23. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٢٣

24. Eebe waxaa u sugnaaday Doomaha socda Badda oo Buuro la mid ah.

وَلَهُ ٱلْجَوَارِ ٱلْمُنشَـَٔاتُ فِى ٱلْبَحْرِ كَٱلْأَعْلَـٰمِ ٢٤

25. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٢٥

26. Dhammaan waxa (Dhulka) korkiisa ah wuu tagi.

كُلُّ مَنْ عَلَيْهَا فَانٍ ٢٦

27. Waxaase hadhi Eebaha wayn ee sharafta leh.

وَيَبْقَىٰ وَجْهُ رَبِّكَ ذُو ٱلْجَلَـٰلِ وَٱلْإِكْرَامِ ٢٧

28. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٢٨

Qorraxdu halkay ka soo muuqato, ama ku qarsoonto, badaha aan isku khaldamaynin Jowharta lagala soo baxo, Doomuhuna dhex sabbeeyaan iyo khalqiga intiisa kalaba Eebaa iska leh, isagaana maamula, wax kasta oo Dhulka ku dul-noolna wuu tagi oo dhiman, wax Eeba ka soo hadhay oo joogi ama baaqi ahaanna ma jiro, saa darteed. waa in la hormarsadaa camal wax tara maalinta aan Naf kale wax taraynin in Eebe doono mooyeen. Ar-Raxmaan (17-28).

---

29. Waxaa Eebe wax waydiista Samada iyo Dhulka waxa ku sugan, goorwalbana wuxuu maamuli arrin.

يَسْـَٔلُهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ كُلَّ يَوْمٍ هُوَ فِى شَأْنٍ ٢٩

30. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٣٠

31. Waana idin xisaabin si dhab ah Insi iyo Jinniyow.

سَنَفْرُغُ لَكُمْ أَيُّهَ ٱلثَّقَلَانِ ٣١

32. Nimcooyinka Eebana teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ٣٢

33. Jinni iyo Insiyow haddaad kartaan inaad ka baxdaan Samada Jahooyinkooda iyo Dhulka ka baxa, kamana bixikartaan xujo la‘aan.

يَٰمَعۡشَرَ ٱلۡجِنِّ وَٱلۡإِنسِ إِنِ ٱسۡتَطَعۡتُمۡ أَن تَنفُذُواْ
مِنۡ أَقۡطَارِ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ فَٱنفُذُواْۚ لَا تَنفُذُونَ
إِلَّا بِسُلۡطَٰنٖ ﴿٣٣﴾

34. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٤﴾

35. Eebe (hadduu doono) wuxuu idinku diri Olol Naar ah, iyo Maar (la dhalaaliyay) umana gargaarsanaysaan.

يُرۡسَلُ عَلَيۡكُمَا شُوَاظٞ مِّن نَّارٖ وَنُحَاسٞ فَلَا تَنتَصِرَانِ ﴿٣٥﴾

36. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٦﴾

37. Markay Samadu dillaacdo oy noqoto ubax guduudan oo subag la mid ah (dhalaasho) markaas dadkaa la abaalmarin).

فَإِذَا ٱنشَقَّتِ ٱلسَّمَآءُ فَكَانَتۡ وَرۡدَةٗ كَٱلدِّهَانِ ﴿٣٧﴾

38. Nimcooyika Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٣٨﴾

39. Maalintaas Ruux la warsan dambigiisa Insi iyo Jinniba ma jiro.

فَيَوۡمَئِذٖ لَّا يُسۡـَٔلُ عَن ذَنۢبِهِۦٓ إِنسٞ وَلَا جَآنّٞ ﴿٣٩﴾

40. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٠﴾

Cidwalba way ubaahantahay Ilaaheed, cir iyo Dhul iyo meel kastaba ha joogtee, Eebana isagaa goor walba maamula khalqigiisa, isagaana xisaabin Qiyaamada, wax awood ah ama xoog ah oo ilaahay lagaga hortagaana ma jiro, iyo wax ka carari kara midna, xumaanlowgana wuxuu ku abaal-marin xumaan, wax gargaara ahna ma helo maalinta xisaabta iyo Qiyaamaha, Eebana wax kama qarsoona cidna wax ma warsado Maalinta abaal-marinta. Ar-Raxmaan (29-40).

---

41. Dambiilayaasha waxaa lagu aqoonsan astaamahooda, waxaana la qaban Foodda iyo gommadaha (Naartaana lagu tuuri).

يُعۡرَفُ ٱلۡمُجۡرِمُونَ بِسِيمَٰهُمۡ فَيُؤۡخَذُ بِٱلنَّوَٰصِي
وَٱلۡأَقۡدَامِ ﴿٤١﴾

42. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan,

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٢﴾

43. Tani waa Jahannamadii ay beeniyeen Dambiilayaashu (yaa lagu dhihi).

هَٰذِهِۦ جَهَنَّمُ ٱلَّتِي يُكَذِّبُ بِهَا ٱلۡمُجۡرِمُونَ ﴿٤٣﴾

44. Waxay ku meereysan Jahannamo iyo biyo kulayl daran dhexdooda.

يَطُوفُونَ بَيۡنَهَا وَبَيۡنَ حَمِيمٍ ءَانٖ ﴿٤٤﴾

45. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٥﴾

46. Ruuxii ka yaaba Eebe hor istaaggiisa wuxuu mudan Laba Janno.
وَلِمَنْ خَافَ مَقَامَ رَبِّهِۦ جَنَّتَانِ ﴿٤٦﴾

47. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٧﴾

48. Jannooyinkaas oo midabyo leh (iyo Laamo).
ذَوَاتَآ أَفْنَانٍ ﴿٤٨﴾

49. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٤٩﴾

50. Waxaa laga helaa ilo socda.
فِيهِمَا عَيْنَانِ تَجْرِيَانِ ﴿٥٠﴾

51. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥١﴾

52. Waxaa laga helaa nooc kasta oo Faakiha ah (Khudaar ah).
فِيهِمَا مِن كُلِّ فَٰكِهَةٍ زَوْجَانِ ﴿٥٢﴾

53. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٣﴾

Sama falaha iyo xumaan faluhu iskuma qasna Eeba agtiisa, waxaana dambiilaha lagu aqoonsan calaamooyinkiisa, ciqaab iyo Naarta Jahannama oo lagu tuurana wuu la kulmi, taasoo uu dhexmeereysan, lamana dulmiyin ee isagaa xaqa beeniyay, Ruuxiise ka yaaba Eebe la kulankiisa iyo xisaabtiisa waxaa lagu abaalmarin Janno wanaag ku dhanyahay, Nicmooyinka Eebeheen waa in lagu mahadnaqo khayrkana loogu kaalmaysto. Ar-Raxmaan (41-53).

---

54. Waxay ku dangiigsan (ehlu Jannuhu) Gogol ay tahay hoosteedo istabraq (xariir) Midhaha Jannooyinku waa u dhawyihiin.
مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ فُرُشٍۭ بَطَآئِنُهَا مِنْ إِسْتَبْرَقٍ ۚ
وَجَنَى ٱلْجَنَّتَيْنِ دَانٍ ﴿٥٤﴾

55. Nicmooyinka EebeTeebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٥﴾

56. Jannooyinka iyo Firaashka waxaa ku sugan Haween Indha waawayn oo dhawrsoon oosan taabanin horay Insi iyo Jinni midna.
فِيهِنَّ قَٰصِرَٰتُ ٱلطَّرْفِ لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ
وَلَا جَآنٌّ ﴿٥٦﴾

57. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.
فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٧﴾

58. Waxaad moodaa Haweenkaas Yaaquut iyo Murjaan (Jawhar midab leh).
كَأَنَّهُنَّ ٱلْيَاقُوتُ وَٱلْمَرْجَانُ ﴿٥٨﴾

59. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٥٩﴾

60. Wanaag abaalkiisu soo wanaag ma aha.

هَلْ جَزَآءُ ٱلْإِحْسَٰنِ إِلَّا ٱلْإِحْسَٰنُ ﴿٦٠﴾

61. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦١﴾

Adduunku waa Guri shaqo, Aakhirana waa Guriga abaal-marinta, Suuraddanna wax badan yuu Ilaaheen kaga warramay jannada iyo tilmaameheeda, iyo wanaaggeeda, iyo in ehlu Jannuhu ku noolaan khayr iyo Nicmo, iyo wax kasta oo wanaag ah, Eebaana ku abaal mariyay Nicmadaas, maxaa yeelay wanaag abaalkiisu waa wanaag.
Anas Binu Maalik waxaa laga wariyay inuu yidhi: Rasuulka Eebe yaa akhriyay Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee: (Wanaag Abaalkiisu soo wanaag ma aha) wuxuuna yidhi: «Ma ogtihiin wuxuu Eebihiin yidhi?» waxay dheheen: Eebe iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yidhi: «wuxuu leeyahay Ruuxaan ugu Nicmeeyay Eebe aqoonsi abaalkiisu waa Janno». waxaa shegay Bagawi. Ar-Raxmaan (54-61).

---

62. Waxay heli Labadaas Janno ka sokow kuwa kale.

وَمِن دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ﴿٦٢﴾

63. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٣﴾

64. Waana Laba Jannoo madow (cagaaran).

مُدْهَآمَّتَانِ ﴿٦٤﴾

65. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٥﴾

66. Waxaa dhexdeeda ah Laba ilood oo burqan.

فِيهِمَا عَيْنَانِ نَضَّاخَتَانِ ﴿٦٦﴾

67. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٧﴾

68. Dhexdooda waxaa ah Faakihad (khudrad) iyo Timir iyo Rummaan.

فِيهِمَا فَٰكِهَةٌ وَنَخْلٌ وَرُمَّانٌ ﴿٦٨﴾

69. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٦٩﴾

70. Dhexdooda waxaa ah Haween khayr leh oo Quruxsan.

فِيهِنَّ خَيْرَٰتٌ حِسَانٌ ﴿٧٠﴾

71. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧١﴾

72. Waa Haween Indhacad oo Gurigooda jooga.

حُورٌ مَّقْصُورَٰتٌ فِى ٱلْخِيَامِ ﴿٧٢﴾

73. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٣﴾

74. Waa Haween uusan horay u taabanin Insi iyo Jinni midna.

لَمْ يَطْمِثْهُنَّ إِنسٌ قَبْلَهُمْ وَلَا جَآنٌّ ﴿٧٤﴾

75. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٥﴾

76. Waxayna ehlu-Jannuhu ku dangiigsan Barkimo cagaaran iyo Gogol Quruxsan,

مُتَّكِـِٔينَ عَلَىٰ رَفْرَفٍ خُضْرٍ وَعَبْقَرِيٍّ حِسَانٍ ﴿٧٦﴾

77. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.

فَبِأَيِّ ءَالَآءِ رَبِّكُمَا تُكَذِّبَانِ ﴿٧٧﴾

78. Waxaa barakadiisu badnaatay Magaca Eebaha wayn ee shrafta leh.

تَبَٰرَكَ ٱسْمُ رَبِّكَ ذِى ٱلْجَلَٰلِ وَٱلْإِكْرَامِ ﴿٧٨﴾

Saasoo kale waxay Aayadahani ka qisoon Jannada iyo ehelkeeda iyo waxa wanaag ah ee Eebe ku dhammeeyay, waxayna Suuraddu ku soo uruursatay markay wax badan soo Celcelisay Nicmada Ilaahay iyo inaan la beeninin waynida Ilaaheen iyo sharaftiisa, waxaana waajib ah in si dhab ah loo qaddariyo loona caabudo, maxaa yeelay waa Ilaaha Adduunkiyo Aakhiraba, Ee mu'miniinta u naxariista, Dambiila-yaashana ka aarsada.
Waxaa la waydiiyay Xasanul-Basri hadalka Eebe Sarreeye (Gogol quruxsan) Wuxuuna yidhi: Waa Gogosha ehlu-Jannaha ee Aabihiin waayee doona. Ar-Raxmaan (62-78).

## Suurat Al-Waaqicah

## سُورَةُ الْوَاقِعَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa Ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Markay Qiyaamadu dhacdo.

إِذَا وَقَعَتِ ٱلْوَاقِعَةُ ﴿١﴾

2. Dhiciddaas wax beenin ma jiro (markay arkaan).

لَيْسَ لِوَقْعَتِهَا كَاذِبَةٌ ﴿٢﴾

3. Waana (mid) hoos u dhiga kor u dhiga ah.

خَافِضَةٌ رَّافِعَةٌ ﴿٣﴾

4. Marka la gilgilo Dhulka gilgilid.

إِذَا رُجَّتِ ٱلْأَرْضُ رَجًّا ﴿٤﴾

5. Buurahana la ridqo.

وَبُسَّتِ ٱلْجِبَالُ بَسًّا ﴿٥﴾

6. Oy noqoto boodh Firdhisan.

فَكَانَتْ هَبَآءً مُّنۢبَثًّا ﴿٦﴾